



Warbixinta Shilka Caymiska Iskaa ah (SIF-2) tilmaamaha ee Shaqalaaha

Shaqaalah

Waxaad leedahay xaqa turjubaanka inuu kaa caaivo adigu inaad fahantgo ookubuuxiso foomkan luqadaada dookha ah. Adeegu waa bilaasha. Haddii aad jeelaan lahayd turjubaan, fadlan ogaysii loo shaqeeyahaaga.

Buuxi foonka Qaybta shaqaalaha. Isticmaal qalin oo aad u cadaadi. Sii foomka buuxa loo shaqeeyaha marka aad dhammayso. Macluumaadka aad bixiso addoo caawimo ka helaya waxay caawiyaan go'aaminta haddii aad u qalanto dheefaha.

1. **Sharax dhaawaca ama jirrada faahfaahin badan sida aad karto.** Tusaale ahaan, haddii gacantaada dhaawac gaadhey dhicitaanka xaga shaqada, sheeg *mida* gacantu tahay *sida* dhicitaanku u dhacay. Haddii xaaladaadu kobocday wakhti ka dib, sharax waxa sababay xaaladaada iyo intay ahayd muddada wakhtiga dhibaatadu ay dhacday.
 2. **Bixi dhammaan macluumaadka aanu ka codsano SIF-2** ku saabsan shaqadaada, heerka qoyska, iyo ku tiirsanayaasha. Macluumaadka waxaa loo isticmaalaa in lagu xisaabiyo dheefahaaga.
 3. **Akhri Ogaysiiska Sharciga ah ee nuqulka shaqaalaha ee foomka SIF-2** ka hor inta aanad soo gelin.

Todoba shay oo aad u baahantahay inaad samayso marka sheegashadaada la habbeeyo.

1. **Dooroo adeeg bixiyahaaga daryeelka caafmaadka ee Shqada iyo Warshadaha (L&I) Shabakada Adeeg bixiyaha Caafimaadka**, xataa haddii qof kale uu kuula dhaqmay sax ka dib dhaawaca. Waxaad dooran kartaa noocyada soo socda ee adeeg bixiyaasha ruqsada u haysta inay daaweeyaan dhaawacaaga oo isku duba ridaan daryeelkaaga, caafimaadka, ku daawaynta duugista muruqyada, dawaynta kala goysyada, ku dawaynta iyaddoon dawo la isticmaalin, ama dawaynta cagaha; hawlbadadeenada caafimaadka ee kalkaaliskasare ee diiwaanka gashan (advanced registered nurse practitioner, ARNP); dhakhtartarada ilkaha iyo cabbirka indhaha. Diiwaanka adeeg bixiyaha waxaa laga heli karaa www.Lni.wa.gov/FindADoc. Waydii maareeyahaaga sheegashada wax ku saabsan magdhowga haddii aad safrysa. Magdhowga safarka waa in hore loo sii oggolaadaa.
 2. **Wixii ah habbaynta cusub iyo shaqada warqaddaha oo ka yar, fadlan dhammaystir Warbixinta Hore ee Adeeg bixiyaha (Provider Initial Report, PIR) si buuxda adeeg bixiyayaashaada.** La xidhiidh adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaad Hubso in adeeg bixiyahaagu ogaado dhaawacaaga ama cudurka shaqada inuu yahay mid shaqada la xidhiidha iyo inaad u shaqayso loo shaqeeyaha iskii isku caymiya. Kala hadal adeeg bixiyaha wax ku saabsan waajibka fudud iyo xayiradaahaaga jidhka. Adeeg bixiyahaagu waxa uu u diri doonaa warbixintan loo shaqeeyahaaga ama wakiilkooda.
 3. **Kala hadal adeeg bixiyahaaga fursadaha waajibka fudud** Haddii dhakhtarkaagu ku siiyo oggolaanshaha iyo xayiradaaga shaqada gaarka ah. Shaqaalo badan oo dhaawacmay waxay ku sii wadi karaan shaqada mushahar buuxa sababtoo ah loo shaqeeyayaasha waxaya wood u yeelan doonaan inay wax ka beddelaan waajibaadkooda marka ay bogsadaan. Ama loo shaqeeyahaagu waxa uu ku kaabi karaa mushahar la yareeyay meelo kala duwan. (Fiilo: lacag bixinta wakhtiga khasaray **aad ayay** uga yar yihiindakhliga ka yimid shaqada.)
 4. **Ma bixiso biilasha caafimaadka ama dawo qorida la xidhiidha dhaawacaaga.** Haddii uu farmasii u baahanyhay inaad bixiso, hayso risiidhka oo waydii loo shaqeeyahaaga ama wakiilkha kooxda saddexaad inuu kuu magdhabo adiga haddii sheegashadaada la oggolyahay.
 5. **Diyaarso lambakaaga sheegashada** oo ku dar dhammaan warqaddaha aad u dirayso loo shaqeeyayaahaaga ama wakiilkha kooxda saddexaad.
 6. **Warqad u qor maareeyahaaga sheegashada haddii aad guurto ama beddesho adeeg bixiyayaasha daryeelka caafimaad.** Isbeddeladu waa inay qoraal ahaadaan oo adigu aad saxeexdaa. Xusuuso inaad ku dul qorto lambakaaga sheegashada, U dir maclumaad maareeyahaaga sheegada.
 7. **Kala shaqee dhammaan codsiyada macquulka ah** ee ka yimid adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka, iyo kuw akale ee loo oggolyahay inay caawiyaan daawayntaad aiyo bogsashada.